

# Agoosto 6, 2024

## Doorashada Hordhaca iyo Gaarka

Macluumaadka diiwaan gelinta codbixiyaha iyo doorashada



### Macluumaadka diiwaan gelinta codbixiyaha

#### Shuruudaha

Si aad isku diiwaan geliso oo aad uga codeyso Washington, waa inaad tahay:

- Muwaadin Mareykan ah
- Degane sharci ahaan ku nool gobolka Washington
- Ugu yaraan 18 sanno jir ah marka la gaaro maalinta doorashada - Haddii aad tahay 16 ama 17 jir, waxaad isku qori kartaa kan Codbixiyaha Mustaqbalka ahaan oo si toos ah ayaa lagu diiwaan gelinayaa marka aad u qalanto
- Qof aan laga mamnuucin codeynta amar maxkamad awgeed
- Qof aan lagu haynin xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington xukun dambi-weyn oo ka dhacay Washington awgeed
- Qof aanan hadda xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federaal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa

#### Sida la isku diiwaan geliyo

##### Oonleen

Waxaad iska diiwaan gelin kartaa ama diiwaan gelintaada ka cusboonaysiin kartaa oonleena barta [VoteWA.gov](http://VoteWA.gov). Hubi inaad oonleena iska diiwaan geliso ugu dambeyn Julaay 29 wakhtiga kama dambeysta ah ee Doorashada Hordhaca iyo Gaarka ee Agoosto 6.

##### Boostada

Ka soo dejiso oo daabac foomka diiwaan gelinta codbixiyaha barta [kce.wiki/VoterReg](http://kce.wiki/VoterReg) si aad isku diiwaan geliso ama aad u cusboonaysiiso diiwaan gelintaada oo boostada ugu dir xafiiskeena ugu dambeyn Julaay 29 wakhtiga kama dambeysta ah ee Doorashada Hordhaca iyo Gaarka ee Agoosto 6.

##### Shakhsi ahaan

Waxaad shakhsi ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa barta xarunta codbixinta ilaa iyo Agoosto 6, Maalinta Doorashada. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan goobaha iyo saacadaha xarumaha codbixinta, booqo [kingcounty.gov/elections](http://kingcounty.gov/elections).

#### Ka dhig diiwaan gelintaada codbixiyaha inay tahay mid hadda shaqaysa

Cusboonaysii diiwaan gelintaada haddii aad guurtay ama beddeshay magacaaga, ama haddii uu saxiixaagu isbeddelay. Si sahlan macluumaadkaaga uga cusboonaysii oonleena ama soo gudbi foom diiwaan gelin cusub ugu dambeyn Julaay 29 ee Doorashada Hordhaca iyo Gaarka ama shakhsi ahaan nooga soo booqo ilaa iyo Agoosto 6, Maalinta Doorashada, mid ka mid ah xarumaheena codbixinta ee lagu soo bandhigay webseedkeena Doorashooyinka Degmada King.

#### Macluumaadka warqadda codbixinta

Maalinta Talaadada, Agoosto 6, 2024 gudaha Degmada King, Washington, waxaa ka dhaci doona Doorashada Hordhaca iyo Gaarka oo gebi ahaanba lagu qabanaayo adeegga boostada.

### Warqad codbixin beddelaad ah

Soo wax Doorashooyinka Degmada King si aad u hesho warqad codbixin beddelaad ah haddii xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee asalka ahayd ay kaa dhunto, xumaato, ama ay burburtay.

#### Caawinaad ayaa diyaar ah

Caawinaadda diiwaan gelinta iyo qalabka codbixinta ee la heli karo ayaa diyaar ah. La xirii Doorashooyinka Degmada King si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

#### Shirarka guddiga shahaadaynta doorashooyinka

Si loo buuxiyo shuruudaha qaanuuniga ah ee ku saabsan shahaadaynta warqadaha codbixinta ee doorashada, shirarka soo socda ee Guddiga Shahaadaynta Doorashooyinka waa:

##### Agoosto 15, 1:30 p.m.

Shirka Ugu Horeeya/Ugu Dambeyna ee Doorashada-Kadib Lagu qabanayo barta Doorashooyinka Degmada King

##### Agoosto 20, 3:00 p.m.

Shirka Shahaadaynta Lagu qabanayo muuqaal ahaan barta bogga Facebook-ga ee Doorashooyinka Degmada King

Tijaabooyinka caqli-galnimada iyo saxnaanta ee rasmiga ah ayaa lagu qaban doonaa Waaxda Doorashooyinka Degmada King marka ay taariikhdu tahay Julaay 11, 2024. Tijaabinta cutubada codbixinta la heli karo ayaa la qaban doonaa 9 a.m. Tijaabinta qalabka xisaabinta ayaa la qaban doonaa 1 p.m.

Tijaabooyinka caqli-galnimada iyo saxnaanta qalabka xisaabinta ee kala barka-doorashooyinka dhexdeeda ayaa dhaci doona Agoosto 5, 2024, 8:00 a.m.

Doorashooyinka Degmada King ayaa ku sugan barta 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Ciwaanka bogga Facebook-ga ee Doorashooyinka Degmada King waa [facebook.com/kcelections](http://facebook.com/kcelections). Dadweynaha ayaa lagu casuumayaa inay ka soo qayb galaan shirarka Guddiga Shahaadaynta Doorashooyinka iyo tijaabooyinka caqli-galnimada iyo saxnaanta.



#### Nala soo xirii

##### Taleefan:

206-296-VOTE (8683)  
1-800-325-6165  
TTY Relay: 711

##### limeel:

[elections@kingcounty.gov](mailto:elections@kingcounty.gov)

##### Oonleen:

[kingcounty.gov/elections](http://kingcounty.gov/elections)

##### Boosto ama shakhsi ahaan:

919 SW Grady Way  
Renton, WA 98057